



SOMALISKA RIKSFÖRBUNDET I
SVERIGE (SRFS)
URURKA ISBAHAYSIGA UMMADDA SOOMAALIYEED EE
ISWIIDHAN

Press release

Taariikh 05/05/09

Uj: Cambaarayn ku lid ah Safiirka Dawladda Ethiopia ee Sweden

Annagoo Tixraacaya waraysi Safiirka dawladda Ethiopia u fadhiya Daka Sweden siiyay wargayska Realtid, taaiikhdu markay ahayd 30ka April, 2008. http://www.realtid.se/ArticlePages/200804/29/20080429180348_Realtid640/20080429180348_Realtid640.dbp.asp

Waxaaan halkan ku cambaaraynaa ereyada naca (Hot mot folk) iyo isku dirku ku dheehan yihiin ee safiirku ku hadlay, taasoo aflagaaddo ku ah muwaadiniin swedish oo aan wax danbi ah galabsan si nabad galyo ahna ugu nool dalkooda.

Safiirku wuxuu waraysiga ku sheegay in dadka swedishka ah ee asalkodu soomalida yahay ay wada yihiin argagixiso, aan shaqaysan, kuna nool lacagta Bidragga, taasoo aysan siin qoysaskooda oo ay toos ugu diraan kooxo aragagixiso ah.

Hadalada safiirka oo aan wax raadraac lahayn haba yaraatee waxay meel kaga dhacayasaa qaanuunka xoriyadda hadalka, iyo nidaamka xeerinaya xasaanadda diplomaasiyadda ee safiirnimo (Diplomatic immunity).

Safiirku wuxuu kaloo ka been abuuray dawladda Sweden asagoo sheegay inay wada xidheen soomalida dalkan ku nool idil oo argagixiso ah, ayadoo aysan jirin haba yaraatee go'aan dawladda Sweden ka soo baxay, uuna garan la' shaqada hay'adaha nabad gelyada iyo Dawladda Sweden.

Sidoo kale wuxuu ku tilmaamay muwaadiniinta swedishka ah ee deggen xaafadda Rinkby inay wada tahay argagixiso, taasoo meel uga dhacaysa sharafta dad badan oo muwaadiniin ah oo wax dambi ah aan dalkooda ka gelin.

Uuruka isbahaysiga Soomaalidu wuxuu u arkaa in Safiirku uu u soo wareejiyay dalka Sweden colaaddii soo jireenka ahayd mudada 50ka sano ka badan u dhaxaysay Somalia iyo Ethiopia, asagoo ku xadgudbay xuquuqda dad swedish ah oo nabad jecel waddankoodana uu marti ugu yahay.

Besöksadress hemsida:	Postadress	telefon	Fax	Org.nr:	postgiro:	E-post	SRFS
Gävle gatan 25.	Box 19165 S-104 32 Stockholm	08-16 69 61	08-54 54 69 61	802401-5177	153 54 74-9	srf@telia.com	



SOMALISKA RIKSFÖRBUNDET I SVERIGE (SRFS) URURKA ISBAHAYSIGA UMMADDA SOOMAALIYEED EE ISWIIDHAN

Haddaba, Uruurka isbahasiga Somalida oo matala dadka Somalida ee dalkan deggen oo ka mid ah qowmiyadaha ugu tira badan ee ku nool Sweden, wuxuu si kulul u cambaaraynayaa ereyada cunsuriyadda iyo naca ka buuxo ee safiirku ku eedeeyay umadda soomaaliyeed.

SRFS wuxuu ka codsnayaa inay

ka xayuubiso xasaanadda diplomaasiyadeed safiirka dalka Ethiopia u fadhiya stockholm, maadaama uu aflagaaddo aan sal lahayn u gaystay dad Swedish uuna caddayn ka bixiyo eedaymaha uu soo jeediyay .

Waxaan codsanaynaa in hay'adaha dawladda ee ay khusayso inay talaabo ka qaaddo:

- 1- been abuurka uu safiirku ku sameeyay go'aan aysan dawladdennu gaadhin
- 2- inuu soo caddeeyo meel ka dhaca uu u geystay dad badan svenska-somalier ah oo wada shaqaysta canshuur bixiyayaalna ah oo ku tilmaamay inay wada shaqaysan.
- 3- Uuna caddeeyo argagixisinimada uu ku wada sheegay dhamaan dad u dhshay waddan uu marti u yahay oo wax danbi ah gelin.

SRFS wuxuu kaloo dambi ku soo oogayaa safiirka sida indha la'aanta ah ugu xadgudbay xuquuqda dadka swedishka ah asaga ka codsanaya hay'adaha shari fulinta sida Booliska iwm inay talaabo lid ku ah ka qaadaan hadalada naca (hets mot folkgrupp) iyo dhiiregelin colaadeed.

M A H A D S A N I D I I N

FG. War mutiyeedkan waxaa kaloo uu ku qoran yahay luqadaha Svenska iyo Egnlish ayadoo bogga internetka laga heli doonaa
Faafaahin dheeraad ahna waxaa lagala soo xiriiri karaa MOB. 0700334391

Besöksadress hemsida:	Postadress	telefon	Fax	Org.nr:	postgiro:	E-post	SRFS
Gävle gatan 25.	Box 19165 S-104 32 Stockholm	08-16 69 61	08-54 54 69 61	802401-5177	153 54 74-9	srf@telia.com	